

Medical Assistance sida ku cad doorashada TEFRA

Medical Assistance (MA) sida ku cad doorashada TEFRA waxay caruurta naafada ah ee qoysaska dakhligoodu ka sarreeyo heerka u qalmitaanka barnaamijka MA u oggolaanaysaa inay u qalmaan barnaamijka MA. Si cunugga uu ugu qalmo barnamijka MA sida ku cad doorashada TEFRA, waa inuu buuxiyaa dhammaan shuruudaha soo socda:

- Waa inuu yahay cunug la go'aamiyay inuu u qalmin barnaamijka MA marka dakhliga waalidka la xisaabinayo
- Waa in uu ka yar yahay 19 jir
- Waa in uu yahay cunug la nool ugu yaraan mid ka mid ah waalidkii dhalay, waalid korsaday ama qof ay is qabaan waalidkii dhalay
- Waa inuu yahay cunug ay caddeeyeen inuu naafo yahay kooxda Social Security Administration ama the State Medical Review Team (SMRT)

Waalidiinta lagama rabo inay bixiyaan khidmadaha waalididka ee billaha ah marka laga reebo haddii cunuga lagu haayo meel ka baxsan gurigooda.

Sida loo codsado barnaamijka Medical Assistance sida ku cad doorashada TEFRA

Tallaabada 1aad: Ka codso Kaalmada Caafimaadka halkaan www.MNSure.org. Dooro "Apply for health care WITH financial help."

- Haddii ilmahaaga loo ansixiyo Kaalmada Caafimaadka, uma baahnid inaad codsato barnaamijka MA sida ku cad doorashada TEFRA.
- Haddii ay ku soo gaarto fariin sheegeysa in ilmahaagu aanu qalmin barnaamijka MA sababo la xiriira arrimo dakhli awgeed, ku sii soco talaabada 2aad.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [websaydka MNSure ee Sida Loo Codsado](#). [Foomamka codsiga waxaad ku heli kartaa qaab online ah si aad u soo degsato oo aadna u daabacato](#) ama wac 651-539-2099 or 855-366-7873 wixii caawimaad ah.

Tallaabada 2aad: Halkaan kala xiriir Hennepin County EZinfo: 612-596-1300. Riix 2 si aad u hesho kaalmooyinka daryeelka caafimaadka.

- U sheeg Wakiilka Adeegga Aadanaha (HSR) in fariin diidmo ah aad ka heshay MNSure oo aadna cunugaaga u dooneyso barnaamijka MA sida ku cad doorashada TEFRA. Gacanta ku hayso ogeysiiska diidmada.

- HSR waxay codsi ku saabsan soo caddeynta naafanimada ilmahaaga u gudbin doonaan kooxda State Medical Review Team (SMRT).

Tallaabada 3aad: Gacan ka sii kooxda SMRT si ay u go'aamiyaan in ilmahaagu uu buuxiyay shuruudaha naafonimada ee TEFRA iyo in kale.

- Kooxda SMRT waxay kuu soo diri doonaan xirmo soo dhawayn ah oo sharxaysa hanaanka SMRT iyo foomam ay tahay inad buuxiso. Foomamka si toos ah ugu celi kooxda SMRT.
- SMRT dib ayay u eegi doonaan macluumaadkaaga, kaas oo qaadani kara dhowr bilood. Marka SMRT ay go'aankooda garaan, waxay ogaysiin doonaan adiga iyo Hennepin County.
- Kala xiriir SMRT halkaan 651-431-2493 ama 800-235-7396 haddii aad qabto wax su'aalo ah ku saabsan tallaabadan ee midka ah talaabooyinka hannaanka codsiga.

Tallaabada 4aad: Iska sug go'aanka u-qalmitaanka ee ay soo saarayaan Hennepin County.

Hennepin County ayaa ku ogeysiin doonaan marka go'aan laga gaaro codsigaga barnaamijka MA sida ku cad doorashada TEFRA.

Dhigaalada

Hennepin County Economic Supports

Wax ka ogoow fursadahaaga xagga cuntada, lacagta caddaanka ah, daryeelka caafimaadka, kaalmada daryeelka caruurta iyo xaaladaha degdegga ah, iyo taageerada xagga guryaha.

- Wac 612-596-1300
- Saacadaha: Isniin– Jimco, 9 a.m. to 3 p.m.

Hennepin County Front Door

Adeegyo gaar ah oo xagga daryeelka caafimaadka ah ayaa laga yaabaa inuu helo cunugaada naafada ah.

- Wac 612-348-4111
- Saacadaha: Isniin – Jimco, 8 a.m. to 4 p.m.

Website-yo iyo dukumeentiyo onlayn ah oo laga heli karo macluumaad dheeraad ah (Ingiriis kaliya):

- [Hennepin County health care assistance](#)
- [MNsure navigator network](#)
- [Medical Assistance under the TEFRA option](#)
- [Medical Assistance under the TEFRA option for children with disabilities](#) (DHS 7960)
- [Minnesota Health Care Programs](#) (DHS 3182)
- [Minnesota Health Care Programs for people with disabilities](#) (DHS 3546A)
- [Bulletin 23-21-21 DHS Eliminates Parental Fees for Children Receiving MA under the TEFRA Option and HCBS Waivers \(state.mn.us\)](#)

Hel caawimo xagga luqadaada ah

Kala xiriir [Office of Multicultural Services](#) halkaan 612-348-2193.